



**Buugyaraha Macluumaadka
Waalidka ee NYSESLAT**

Ku Soo dhawoow! Hawlgalka Xafiiska Waxbarashada Labada Luuqadood iyo Luuqadaha Adduunka ee Waaxda Waxbarashada Gobolka New York (OBEWL) waa xaqiijinta in dhammaan ardayda Gobolka New York (NYS), oo ay ka mid yihiin Barteyaasha Luuqadda Ingiriiska (ELL-yada)/Barteyaasha Luuqadaha Badan (MLL-yada), ay gaaraan heerka ugu sarreeya ee guusha tacliimeed iyo si fiican u aqoonista luuqadeed. Waxaan ku dadaaleynaa in aan hubino in dhammaan dariiqooyinka waxbarashada shaqsi ee ardayda iyo baahiyada shucuurta iyo bulshada looga soo baxo luuqado badan oo u horseedayisa u diyaarsanaanta kuleej iyo xirfadda shaqo. Sannad kasta ilmahaaga waxaa la siiyaa qiimeynta si fiican u aqoonista, Imtixaanka Guusha Ingiriiska Sida Luuqadda Labaad Ahaan ee Gobolka New York (NYSESLAT).

HORUDHAC

NYSESLAT waxaa la siiyey dhammaan ardayda ee loogu aqoonsado sida ELL/MLL Imtixaanka Aqoonsiga Barteyaasha Luuqadda Ingiriiska ee Gobolka New York (NYSITELL). Ujeeddada NYSESLAT waa in si sannadle ah loo qiimeeyo heerka si fiican u aqoonista luuqadda Ingiriiska ELLs/MLLs ee ku qoran Fasallada K–12 ee dugsiyada Gobolka New York. Imtixaanka wuxuu siinayaa gobolka, dugsiyada, waalidiinta, iyo macalimiinta macluumaad muhiim ah oo ku saabsan horumarinta luuqadda Ingiriiska ee ELLs/MLLs.

GOORMEE AYAA NYSESLAT LA BIXIYAA?

NYSESLAT waxaa sida caadiga ah la maamulaa xilliga gu’ga inta lagu guda jiro Abriil iyo Maajo.

WAA MAXAY NOOCYADA SU’AASHA EE ARDAYDA LA WAYDDIINAYO?

NYSESLAT waxaa ka mid ah kala-doorasho, su’aalaha jawaabtooda sida gaaban loo qoro, su’aalaha jawaabtooda sida dheer loo qoro, iyo su’aalaha jawaabtooda afka ah ee dhageysiga, hadalka, akhriska, iyo qoraalka oo Ingiriis ah. Ilmahaaga waa in uu qaato dhammaan qaybaha imtixaanka. Su’aalaha NYSESLAT waxay ka ra’yi bixinayaan noocyada waxqabadyada iyo hawlaha ilmahaaga uu kula kulmayo fasalka.

KUMAA MAAMULAYA NYSESLAT?


NYSESLAT waxaa maamula bareyaasha Gobolka New York ee aqoonta u leh.

SIDEEN KU HELI KARAA NUQLKA NATIJOYINKA NYSESLAT EE ILMAHEYGA?

Dugsiga wuxuu bixinayaa warbixinta natijada NYSESLAT ee ku siinaysa macluumaad gaar ah oo ku saabsan horusocodka horumarinta luuqadda Ingiriiska ee ilmahaaga.

WAA MAXAY HEERARKA SI FIICAN U AQOONISTA LUUQADDA INGIRIISKA EE SANNAD DUGSIYEEDKA 2015-2016 IYO WIXII KA DAMBEEYA?

Si fiican u aqoonista luuqadda Ingiriiska waxay isu beddeshey heerka si fiican u aqoonista afar ilaa shan si loogu oggolaado kala-sheegidda ardayda:



WAA MAXAY WAXA LOOLA JEEDO HEERARKA SI FIICAN U AQOONISTA?

Sharaxaadda Heerarka Si Fiican u Aqoonista NYSESLAT waxaa lagu bixiyaa shaxda hoos.

Heerka	Sharaxaadda Heerka Si Fiican U Aqoonida Luuqadda Ingiriiska	
Gelitaanka (Bilow)	Ardayga heerka Gelitaanka wuxuu aad ugu tiirsan yahay taageero iyo qaab-dhismeed lagu horumarinayo xirfadaha luuqadda tacliinta walina kama soo bixin dalabyada luuqadeed ee loogu baahan yahay in lagu soo bandhigo si fiican u aqoonidda luuqadda Ingiriiska dulucyada (goobo) tacliineed ee kala duwan.	U-qalma Adeegyada ELL
Ka-sookicid (Heer Hoose Dhexe)	Ardayga heerka Ka-sookicidda wuxuu xoogaa ku tiirsan yahay taageero iyo qaab-dhismeed lagu horumarinayo xirfadaha luuqadda tacliinta walina kama soo bixin dalabyada luuqadeed ee loogu baahan yahay in lagu soo bandhigo si fiican u aqoonidda luuqadda Ingiriiska dulucyada hadalka(goobo) tacliineed ee kala duwan.	
Isbeddelaya (Dhexe)	Ardayga heerka Isbeddelaya wuxuu ka muujinayaa xoogaa madax-bannaani ah horumarinta xirfadaha luuqadda tacliinta, balse wali kama soo bixin dalabyada luuqadeed ee loogu baahan yahay in lagu soo bandhigo si fiican u aqoonidda luuqadda Ingiriiska dulucyada hadalka (goobo) tacliineed ee kala duwan.	
Balballaarin (Horumarsan)	Ardayga heerka Balballaarinta wuxuu ka muujinayaa madax-bannaani badan ee ah horumarinta xirfadaha luuqadda tacliinta wuxuuna ku dhow yahay dalabyada luuqadeed ee loogu baahan yahay in lagu soo bandhigo si fiican u aqoonidda luuqadda Ingiriiska dulucyada hadalka (goobo) tacliineed ee kala duwan.	
Horreeya (Aqoon Sare U Leh)	Ardayga heerka Horreeya wuxuu ka soo baxay dalabyada luuqadeed ee loogu baahan yahay in lagu soo bandhigo si fiican u aqoonidda luuqadda Ingiriiska dulucyada hadalka (goobo) tacliineed ee kala duwan. Ardayga heerkani looma tixgeliyo ardayga ELL, balse wuxuu xaq u leeyahay laba sano ee ah adeegyada ELL Hore.	Aan U-qalmin Adeegyada ELL

HADDII ILMAHEYGA UU QABO IEP, DIYAAFADINTA IMTIXAANIDDA MALA OGGOL YAHAY XILLIGA NYSESLAT?

Haa, diyaafadinta imtixaanidda waxaa lala siiyaa ELL-yada Barnaamijyada Waxbarashada Gaarka ah (IEP-yada) marka la qaadanayo NYSESLAT. La hadal macalinka ilmahaaga si aad u hesho macluumaad gaar ah oo ku saabsan diyaafadinta ee uu ilmahaaga xaq u yeelan karo. Hadaad rabto macluumaad badan, fadlan booqo: <http://www.p12.nysed.gov/assessment/nyseslat/>

WAA MAXAY ADEEGYADA UU ILMAHEYGA XAQ U LEEYAHAY ELL/MLL AHAAN?

Ilmahaaga wuxuu xaq u leeyahay adeegyada Waxbarashada Labada Luuqadood (Ku Meelgaarka ah ama Labada Luuqadood) iyo/ama Ingiriiska Sida Luuqad Cusub Ahaan (ENL). Heerka si fiican u aqoonista ilmahaaga wuxuu go'aaminayaa daqiiqadaha adeegyada ELL (waqtiga fasalka) ee asaga ama iyada ay helayaan toddobaad kasta. Ka eeg shaxda hoos daqiiqadooyinka gaarka ah iyada oo la raacayo heerka si fiican u aqoonista.

Heerka	Fasallada K-8 Daqiiqadaha Waxbarista ENL ee toddobaad kasta	Fasallada 9-12 Daqiiqadaha Waxbarista ENL ee toddobaad kasta*	Ardayda Barnaamijyada Labada Luuqadood
Gelitaanka (Bilow)	360 daqiiqo	540 daqiiqo	<ul style="list-style-type: none"> • 1 Kooraska Adabta Luuqadda Guriga • Ugu yaraan 2 maaddo ee ah cilmiga gaarka ah ee labada luuqadood
Ka-sookicid (Heer Hoose Dhexe)	360 daqiiqo	360 daqiiqo	<ul style="list-style-type: none"> • 1 Kooraska Adabta Luuqadda Guriga • Ugu yaraan 2 maaddo ee ah cilmiga gaarka ah ee labada luuqadood
Isbeddelaya (Dhexe)	180 daqiiqo	180 daqiiqo	<ul style="list-style-type: none"> • 1 Kooraska Adabta Luuqadda Guriga • Ugu yaraan 1 maaddo ee ah cilmiga gaarka ah ee labada luuqadood
Balbalaarin (Horumarsan)	180 daqiiqo	180 daqiiqo	<ul style="list-style-type: none"> • 1 Kooraska Adabta Luuqadda Guriga • Ugu yaraan 1 maaddo ee ah cilmiga gaarka ah ee labada luuqadood
Horreeya (Aqoon Sare u Leh)	Ardayga heerka Horreeya wuxuu ka soo baxay dalabyada luuqadeed ee loogu baahan yahay in lagu soo bandhigo si fiican u aqoonidda luuqadda Ingiriiska dulucyada hadalka (goobo) tacliineed ee kala duwan. Ardayga heerkan looma tixgeliyo ardayga ELL, balse wuxuu xaq u leeyahay laba sano ee ah adeegyada ELL Hore.		

*Qayb ka mid ah waxbarista ENL waxay noqon kartaa iyada oo loo marayo fasalka isku dhafan ee cilmiga gaarka ah.

WAA MAXAY ADEEGYADA ELL HORE?

Marka ardayga uu gaaro heerka Horreeya (Aqoon Sare u Leh), ardayga looma tixgeliyo ELL umana qalmo adeegyada ELL, balse wuxuu u qalmaa Adeegyada ELL Hore. Adeegyada ELL Hore waxaa ka mid ah 5 cutub oo waxbarasho toddobaad kasta ee ah ENL Isku-dhafan ee ELA/Maadooyinka Cilmiga Gaarka ah, ama adeegyada ELL Hore kale ee la ansixiyey ee loogu talagalay laba sano oo dheeraad ah. Ardaydan waa in ay sii-wadaan in ay helaan taageero barasho oo gaar ah iyo qiimeyn cabbirta luuqadda iyo horusocodka tacliimeed si loo wanaajiyo natiijooyin tacliimeed.

SIDEEN CAAWIMO UGU GEYSAN KARAA IN ILMAHEYGA UU U DIYAARGAROORO NYSESLAT?

Waxaa jira dhowr waxyaabo ee ay waalidiintu sameyn karaan si ay ugu caawiyaan ardayda in ay u diyaargarobaan NYSESLAT. Halkan waxaa ku qoran xoogaa soojeedimo ah:

- Hubso in ilmahaaga uu helo hurdo ku filan iyo in uu cuno raashiin nafaqo ahaan isku dheellitirin ka hor kulanka imtixaan kasta.
- Waxaad siisaa dhiirrigelin wanaagsan iyo shaki-bixin ku saabsan imtixaanka sababta oo ah taasi waxay si fiican u saameynaysaa darajooyinka imtixaanka ilmahaaga.
- La akhri oo dib-ula eeg ilmahaaga dhammaan macluumaad kasta ee aad hesho oo ku saabsan waayo-aragnimada imtixaanka.
- Ka shaki-bixi ilmahaaga in qiimeyntan ay tahay in ay cabbirto horumarinta luuqadiisa ama luuqadeeda Ingiriiska.
- La kulan oo si dhow ula shaqee macalinka fasalka iyo Ingiriiska Luuqad Cusub Ahaan/Ingiriiska Luuqadda Labaad Ahaan (ENL/ESL) ama Labada luuqadood ee ilmahaaga taageero gaar ah iyo talooyinka ee laga yaabo in aad ku siiso guriga.

KHAYRAADKA IYO GARGAARKA DHEERAADKA AH

Macluumaadka ku saabsan NYSESLAT waxaa laga heli karaa <http://www.p12.nysed.gov/assessment/nyseslat/> and <https://www.engageny.org/resource/spring-2015-nyseslat-resources>. Haddii aad qabto su'aalo dheeraad ah oo ku saabsan heerka si fiican u aqoonista luuqadda Ingiriiska ee ilmahaaga, fadlan la xiriir emscassessinfo@nysed.gov ama wac 518-474-5902. Su'aalaha khuseeya adeegyada labada luuqadood/ENL waxaa lagu hagaajin karaa Xafiiska Waxbarashada Labada Luuqadood iyo Luuqadaha Adduunka (OBEWL) telefoon ahaan 518-474-8775, ama iyada oo loo marsiinayo iimaylka obefls@nysed.gov.

Hadaad rabto su'aalo iyo khuseymo ku saabsan adeegyada ELL fadlan la xiriir

nysparenthotline@nyu.edu

Khatka Tooska ah ee Waalidka ELL: (800) 469-8224

Su'aalo dheeraad ah?

Fadlan u soo dir su'aalaha ama faallooyinka Xafiiska Luuqadaha
Adduunka iyo Waxbarashada Labada Luuqadood:

OBEFLS@nysed.gov

Ama wac: 718-722-2445

Hadaad rabto macluumaad badan oo ku saabsan NYSESLAT booqo:

<http://www.p12.nysed.gov/assessment/nyseslat/>

